

Electroconvulsive therapy

About your rights

Ku daaweynta korontada

Wixii la xiriira xuquuqdaada

Somali

Soo koobid

Haddii dhakhtarkaaga dhimirku kugula taliyo inaad qaadato Ku daaweynta korontada (ECT) adiga:

- Waxaa lagu siin doona macluumaad ku saabsan ECT waxaanad ka weydiin kartaa su'aalo
- Waxaad xaq u leedahay inaad diido ECT, haddii aad awoodo inaad bixiso ka raali ahaanshaha buuxda ee ECT
- Waxaad xaq u leedahay inaad hesho tallo sharci iyo mid caafimaadba
- Waxaad xaq u leedahay inaad hesho fikrad labaad dhakhtar dhimir oo kale wax ku saabsan ECT
- Waxaad xaq u leedahay inaad kaxeysato saaxiib, xubin qoyska ka mid ah ama sharci yaqaan ku metela
- Waxaad ka caban kartaa daaweyntaada
- Waxaad xuquuq u leedahay *Xeerka Xuquuqda Bani'aadamka iyo Masuuliyadka*

Waxaad weydiin kartaa xubin ka mid ah kooxda ku daaweynaysa, saaxiib, xubin qoyska ka mid ah, sharci yaqaan, qof kuu dooda adiga ama qof bulshada kaa soo booqday inuu kaa caawiyo kuwan, ama la xirriir mid ka mid ah ururada ku qoran buuggan yar xaggiisa dambe.

Ku daaweynta korontada

Waxyaalaha ku saabsan xuquuqdaada

Buuggan yar waa lagu siiyey sababtoo ah dhakhtarkaaga ama dhakhtarka dhimirku wuxuu ku taliyey inaad ka faa'iidi doonto coorsada ECT. Waxay bixisaa macluumaad ku saabsan daaweynta iyo xuquuqdaada sharciyeed iyo waxyaalahaad xaq u leedahay marka loo eego *Sharciga Caafimaadka Dhimirka ee 1986*.

Dhakhtarka dhimirka ama xubin ka mid ah kooxda ku daaweynaysa ayaa kula hadli doonta macluumaadkan iyo xuquuqdaada iyo waxyaalahaas xaq u leedahay oo ka jawaabi doona su'aalahaaga.

Macluumaadkan waa in lagu sharxaa luqad ama si aad ku fahmi karto. Buuggan yar waxaa sidoo kale lagu turjumay luqado kale. Waxaad weydiin kartaa xubin ka mid ah kooxda ku daaweynaysa haddii lagu heli karo luqadaad doorbideyso.

Tusmada

ECT: xuquuqdaada iyo waxyaalahaad xaq u leedahay	2
ECT: macluumaadka daaweynta	3
Cabashooyinka	5
Xirriirada muhiimka ah	6

Macluumaadka khadka taleefanka

Waxaad ku dhegaysan kartaa macluumaad duuban oo ku saabsan daaweynta electroconvulsive afaf badan adoo wacaya macluumaadka khadka taleefanka.

Lambarada taleefanku waxay ku qoran yihiin buugan yar xaggiisa dambe.

Khadka taleefanku wuxuu furan yahay 24 saac maalintii, toddobo maalmood isbuucii.

A Victorian
Government
initiative



Nuqulo ka mid ah Sharciga Caafimaadka Dhimirka ayaa laga heli karaa adeega caafimaadka dhimirka.

Haddii aad wakhtigeys doonto ha ahaatee aad wax su'aalo ah qabto ku saabsan macluumaakan ama xuquuqdaada, weydii qof inuu kuu sharxo. Waxaad weydiin kartaa xubin ka mid ah kooxda ku daaweynaysa, saaxiib, xubin qoyska ah, sharci yaqaan, qof kuu dooda ama qof bulshada koo soo booqday.

Xeerka Xuquuqda Bani'aadamka iyo Masuuliyadka

Xeerka xuquuqda Bani'aadamka iyo Sharciga Masuuliyadka ee 2006 ee Victoria wuxuu raadiyaa inuu kor u qaado oo uu ilaaliyo qaar ka mid ah xuquuqda bani'aadamka: xeerku wuxuu qeexaa xuquuqda la ilaalinayo iyo wuxuu ka doonayo adeegyada caafimaadka dhimirka ee dadweynaha inay wax u qabtaan si waafaqsan xuquuqdan.

Xeerka wuxuu sidoo kale ku gaar yeelayaa marka iyo sida xuquuqa uu sharcigu u xaddeyn karo. Tusaale, marka loo eego Sharciga Caafimaadka Dhimirka waxaa lagugu xanibi karaa adeega caafimaadka dhimirka haddii ay lagama maarmaan noqoto si loo ilaaliyo caafimaadkaaga ama ammaanka ama ammaanka dadka kale. Si kastaba ha ahaatee, wixii xanibaad ah ee ku timaada xoriyaada iyo wixii faragelin ah ee xuquuqdaada, arimahaaga gaarka ah, sharafta iyo xushmada naftaada waa in sida ugu yar loo sameeyaa ee suurtagalka ku ah xaaladahaas.

Haddii aad qabto wax su'aalo ah oo ku saabsan xeerka ama sida laga yaabo inuu wax u yeelo daaweyntaada, la xiriir mid ka mid ah ururada ku qoran buuggan xaggiisa danbe.

ECT: xuquuqdaada iyo waxyaalahaad xaqa u leedahay

Dhakhtarkaaga dhimirka ayaa kaala hadli doona wax ku saabsan ECT oo kuu sharxi doona siday u shaqyso iyo siday kaaga caawineyso daaweynta jiradaada. Dhakhtarka dhimirka ayaa kaala hadli doona waxyeelada suurtagalka ah ee daawada iyo daaweynta bedelka ah, ku weydiin doona fikradahaaga oo kaaga jawaabi doona wixii su'aalo ah ee aad qabto.

Markaad kala hadleyso ECT dhakhtarkaaga dhimirka, waxaa kula joogi kara qof si uu kuu siiyo wixii taageero ah. Xaq baad u leedahay inaad soo kaxeysato saaxiib, xubin qoyska ka mid ah, sharci yaqaan ama qof kuu dooda oo ku metela ka hor intaad ka raali ahaansho siin ECT.

Tallo iyo fikradaha labaad

Xaq baad u leedahay inaad hesho tallo caafimaad iyo sharci. Waxaad sidoo kale xaq u leedahay inaad hesho fikrad labaad oo ku saabsan inaad u baahan tahay ECT. Maareeyaha kiiskaaga ama dhakhtarka dhimirka ayaa kuu

sameyn kara fikrada labaad adeega caafimaadka dhimirka gudaheeda ama waxay kaa caawin karaan inaad doorado dhakhtar dhimir adigu. Haddii aad doorato dhakhtarka dhimirka oo gaar ah waxaa laga yaabaa inaad ujro lacag ah bixiso.

Ka raali noqoshada ECT

Haddii aad awoodo inaad bixiso ogolaansho buuxda, waxaa lagu siinayaa ECT oo keliya haddii aad ogolaato. Tan micnaheedu waxaa weeye haddii aad awoodo inaad bixiso ogolaansho buuxda, waxaad xaq u leedahay inaad diido ECT.

Ka raali ahaansho buuxda

ka raali ahaanshaha buuxa waxaa weeye markaad ogolaato inaad qaadato ECT ka dib marka lagu sheego:

- Waxa ECT ku lug leedahay
- Faa'iidooyinka,
- Wixii daaweyn bedel ah oo faa'iido leh
- Jawaabaha su'aal kasta ee aad ka qabto ECT waanad fahamtay jawaabaha
- Inuu qofka kugula talinayaa ECT ama dhakhtarka sameyn doona ECT uu la leeyahay wax xirriir lacageed ah adeegan, isbitaal ama rugta caafimaadka meesha ECT lagugu siin doono
- Xuquuqdaada sharciyeed iyo waxyaalaha kale ee aad xaqa u leedahay.

Ka hor intaad go'aansan inaad qaadato ECT, waxaa muhiim ah in si fiican akhbaarta aad u haysato. Haddii aad qabto wax su'aalo ah, waa inaad weydiisaa dhakhtarkaaga dhimirka ama ka doono tallo saaxiib, xubin qoyska ka ah, sharci yaqaan ama qof kuu dooda ama mid ka mid ah ururada ku qoran buuggan yar xaggiisa danbe.

Haddii aad ogolaato inaad qaadato ECT, waxaa lagu weydiin doonaa inaad saxiixdo foom adoo sheegaya inaad bixisay ka raali ahaansho buuxda.

Dhakhtarkaaga dhimirka ayaa kaala hadli doona inta daaweyn ee laguugu talinayo inaad qaadato. Waxaad ogolaan kartaa inaad qaadato ilaa iyo lix daaweynood. Haddii dhakhtarkaagu rumeysan yahay inaad u baahan tahay wax ka badan lix daaweynood ee bilowga ah, waxaa lagu weydiin doona inaad ogolaansho bixiso daaweyn kasta oo dheeraad ah ilaa iyo lix daaweynood.

Ka noqoshada kaa raali ahaanshaha qaadashada ECT

Haddii aad ogolaato inaad qaadato ECT, laakiinse ka dib aad bedesho go'aankaaga, xaq baad u leedahay inay ka noqoto ka raali ahaanshahaaga wakhti kasta. Waxaa la joojin doona daaweynta inuu rumeysan yahay dhakhtarkaaga dhimirku mooyee inaad awoodin bixinta ka raali ahaansho buuxda.

Haddii aad dooneysid inaad ka noqoto ka raali ahaanshahaaga, waa inaad la hadashaa dhakhtarkaaga dhimirka. Xasuuso inaad soo kaxaysan karto saaxiin, xubin qoyska ah, sharci yaqaan ama qof kuu dooda wixii taageero ah ama si ay kuu matelaan.

ECT haddii aadan awoodin inaad bixiso ka raali ahaansho buuxda

Haddii aadan awoodin inaad bixiso ka raali ahaansho buuxda oo aad ku qaadato ECT, dhakhtarkaaga dhimirka ayaa raali ahaanshaha kuu bixin kara haddii dhakhtarka dhimirku ku qanacsan yahay:

- In ECT –gu yahay lagama maarmaan
- In xaaladaada maskaxeed ama jireed ay u eg tahay inay sii xumaanayaan inaad qaadato ECT mooyee iyo
- In faa'iidada iyo dhibaataada ECT iyo wixii kale ee daaweyn faa'iido leh la tixgeliyey.

Dhakhtarkaaga dhimirka ayaa kaala hadli doona wax ku saabsan ECT ka hor intaadan qaadan daaweynta. Dadaal macquul ah ayaa la sameyn doona si loo wargeliyo xannaaneeyahaaga ugu muhiimsan (xubin qoys) ama saaxiibka masuulka ka ah taageerada ama daryeelkaaga) ama masuulkaaga (haddii aad leedahay mid) wax ku saabsan ECT lagu soo jeediyey.

ECT deg deg ah

Haddii aad si degdeg ah ugu baahan tahay ECT sababtuna tahay xaalada jirada maskaxdaada, waxaa lagu siin karaa ka raali ahaanshahaaga la'aantii. Haddii ay tani dhacdo, dhakhtarkaaga dhimirka ayaa kuu sharxi doona sababta ay daaweyntu degdega u tahay.

ECT: macluumaadka daaweynta

Qaybtan buugga yar waxay leedahay macluumaad ku saabsan ECT.

ECT waxaa loo isticmaalay inay tahay daawo wax ku ool ah qaar ka mid ah jirooyinka dhimirka ee daran sannado badan. Daraasad cilmiyeed ayaa muujisay wax ku oolnimada ECT. Habkan waxaa la hagaajiyey sannadihii dhawaa si loo helo natiijo ka fiican oo leh waxyeelo ka yar kuwii hore. Dhakhtarkaaga dhimirka ayaa kaala hadli doona sababta laguugula taliyey ECT inaad qaadato iyo wixii daawo faa'iido leh oo kale oo la heli karo. Waa muhiim in si wanaagsan aad wax uga ogaato ECT. Weydii dhakhtarkaaga ama xubin kale oo ka mid ah kooxda daaweynta haddii aad qabto wax su'aalo ah ama ay jiraan waxaad ku saluugsan tahay ECT.

Waa maxay ECT?

ECT waa nidaam daawo oo ay sameeyaan dhakhaatiir. Qofka waxaa la siinayaa suuxdin guud iyo wax debciya muruqyadiisa. Markay tani si buuxda loo sameeyo, qofka waxaa maskaxdiisa lagu dhaqaajiyaa si kooban, taxane elekterig ah iyadoo la isticmaalayo electrodes la saarayo meelo kooban oo qofka madaxiisa ah. Dhaqaajintan waxay sababtaa suuxdin dhimirka dhexdeeda ah oo qaadaneysa ilaa laba daqiiqo. Sababtoo ah muruqyada debecsan awgood iyo suuxinta lagu suuxiyey, qofka jirkiisu ma suuxo qofkuna ma dareemo xannuun. Qofku wuxuu toosaa ilaa iyo toban daqiiqo gudahood sidii ay uga soo toosi lahaayeen qaliin yar oo kale.

ECT badanaa waxay ka kooban tahay lix ilaa 12 daaweeynood oo lagu siinayo saddex jeer toddobaadkii wakhti ilaa bil ah. Dhakhtarkaaga dhimirka ayaa kaala hadli doona inta daaweeynood ee aad u baahan doonto.

Goorma ayaa la isticmaalaa ECT?

ECT wuxuu u fiican yahay niyad jabka weyn, rabitaanka badan, qaar ka mid ah schizophrenia, iyo tiro yar oo ah waxyeelada neerfaha iyo dhimirka. Waxaa laga yaabaa in loo isticmaalo markaan daawado waxba tari weydo. Waxaa sidoo kale loo isticmaalaa dadka kala kulma dhibaato khatar ah daawooyinka ama xaaladiisa daawo micnaheedu yahay inaysan u qaadan Karin daawada si ammaan ah. ECT waxaa sidoo kale loo isticmaalaa xaaladaha naf ka dhawrka ah markaysan daawadu si dhakhsaha ugu shaqeynaynin oo ku filan. Waxay gaar ahaan u wanaagsan tahay dadka aadka u niyad jabsan iyo kuwa laga yaabo inay isdilaan.

Go'aanka ah in la maamulo ECT wuxuu ku saleysan yahay qiimeyn dhameystiran oo dhimir oo qofka lagu sameeyo, iyadoo la tixgelinayo nooca jirada, darajada xannuunka, natiijada la rajeynayo iyo wiisitada qofka haddii aan daaweynta la siin. Marka khatarta isdilidu ay sareeyso ama marka qofka aad ka u jiran uusan awoodin inuu wax cunno ama cabo, ECT waxay noqon kartaa nolol badbaadiye.

Ka waran uurka?

Waa inaad u sheegtaa dhakhtarka haddii ay jirto wax fursad ah oo aad uur ku qaadi karto. Go'aanka ah in lagu daaweeyo qofka dumarka ECT waxay u baahan tahay in la tixgeliyo khataraha la xiriira daawooyinka bedelka ah, khataraha hooyada iyo ilmogaleenka iyo u adkeysiga ECT iyo wixii dhibaato ah ee uurku leeyahay oo laga yaabo inuu kordhiyo khataraha ECT ama suuxdinta.

ECT ma sababi kartaa dhaawac maskaxeed?

Maya, ma jirto caddeyn ah inay ECT ay sababto dhaawac maskaxeed ama isbedel waxyeelo badan shakhsinimada qofka.

Maxaan u baahan ahay inaan sameeyo ka hor ECT?

Waa inaad wax soo cunin ama cabin wax dareere ah ama biyo ugu yaraan lix saacadood ka hor daaweynta ECT si loo hubiyo in calooshaadu madhan tahay. Tan waxaa la yiraahdaa 'soomid'. Haddii aad wax cunto ama cabto waxuun wakhtiga soomida dhexdiisa, waa inaad u sheegtaa kalkaalisada ama shaqaalaha caafimaadka ka hor intaan daaweynta la sameyn.

Weli ma qaadan karaa daaweyntaydii?

Dhakhtarkaaga ayaa laga yaabaa inuu bedelo daaweyntaada sababtoo ah daawaynaha qaarkood waxay saameyn karaan sida fiican ee ay u shaqeyn lahayd ECT. Subaxa maalinta daaweynta, waxaa laga yaabaa in lagu siiyo daawo, laakiinse waxaad ku qaadanaysaa kabasho yar oo biyo ah oo keliya.

Sidee baa loo sameeyaa ECT?

Ka hor daaweyntaada kowaad ee ECT, waa lagu baarayaa si loo hubiyo inaad ku haboontahay oo aad caafimaad qabto in suuxdin yar iyo ECT lagu siiyo. Ka dib waxaa lagu weydiinayaa inaad ku sugto qolka sugitaanka ka hor intaan lagu keenin goobta daaweynta halkaas oo aad ku jiifsan doonto trolley shaqaalahaana kugu dhejinaya waxyaalaha soo socda:

- Makiinada dhiiga cabirta ee gacantaada ama lugta ama labadaba
- Qalab yar oo lagu xirayo farahaaga si loo jeegareeyo neefsiga iyo heerka ogsijiinta dhiigaaga ku jirta
- Ul yar oo electrodes ah oo foodaada lagu xirayo iyo dhegahaaga gadaashooda si loo duubo waxqabadka koronto ee maskaxda inta lagu jiro daaweynta
- Maaskarada wejiga iyo sankaa dushiisa iyo afka si lagu siiyo ogsijiin. Tani waa in la diyaariyo jirkaaga iyo maskaxdaada waxqabadka dheeraadka ah ee si kooban u dhici doona marka daaweynta socoto.

Qalab dheeraad ah ayaa laga yaabaa in la isticmaalo haddii ay jirto qodob khatar dheeraad ah oo laga ogaaday taariikhaada daawo, ama baaritaan.

Waxaa lagugu sameyn doonaa suuxdin guud oo gaaban si u hurudo oo aadan u dareemin ama u xasuusan daaweynta.

Daawada suuxinta waxaa lagu duri doona xidid si looga dhigo mid si dhakhsa ah oo wanaagsan u shaqeysa. Dhakhtarka waxa suuxiya khaas ah (dhakhtarka suuxinta)

ayaa joogi doona oo sameyn doona suuxinta. Waxaa sidoo kale lagu siin doona wax debsciya muruqyada.

Dakhtar ku takhasusay tababarka ECT ayaa maamuli doona daaweynta. Dhakhtarku wuxuu ku shubayaa electrodes yar dhakadaada wuxuuna dul marinayaa caddad koronto ah oo cabiran qaybta maskaxda si uu u dhaliyo qalal (suuxdin). Qalalka wuxuu ku ekaanayaa ilaa laba daqiiqo. Inta daaweyntu socoto, dhakhtarka suuxinta wuxuu sii wadayaa inuu kugu siiyo ogsijiin isagoo kuu soo marinaya maaskarada wejiga iyo wuxuuna la soconayaa heerka wadnahaaga iyo wixii fal celin ah ee uu ka sameeyo daaweynta.

Ma dareemi doontid ama xasuusan doontid wax ka mid ah daaweynta dhabta ah sababtoo ah waad hurdeysaa daawada suuxinta awgeed. Daqiiqado yar gudahood daaweynta ka dib, daawada suuxintu waxay ka bixi doontaa jirkaaga markaana waad toosi doontaa. Wakhtigan inta lagu jiro waxaa lagu geyn doona qolka bogsashada, ama ku soo naaxida, halkaas oo lagu ilaalin doono ilaa si fiican oo kugu filan u toosto si aad ugu noqoto waadhkaagii. Haddii nidaamka ECT aad qaadaneyso maalintii waxaa laga yaabaa inaad u baahato inaad ku sugto qolka soo naaxida ama bogsiga ama waadhka ilaa iyo dhawr saacadood si loo hubiyo inaad diyaar u tahay inaad gurigii aado.

Ka dib markaad toosto, daawada suuxintu iyo qalalku waxay kaa dhigayaan wax daalan ilaa wakhti. Caadi ahaan waxaad diyaar u noqoneysaa cunto qiyaastii 15-20 daqiiqo daaweynta ka dib.

Waa maxay khataraha iyo faa'idooyinka ECT?

Dhakhtarkaaga dhimirka ayaa kaala hadli doona adiga faa'idooyinka la rajeynayo ee ECT. Kuwani way isbedelayaan iyadoo ku xiran xaalada iyo khatarnimada jiradaada, laakiin ECT guud ahaan waxay isbedelaysaa awoodaada fekerka oo aad dib ugu celin lahayd fikradahaaga qaab caafimaad leh.

Dhammaan daaweyntu waxay leedahay khataro iyo waxyeelo xitaa daaweyn la'aantu waxay leedahay khataro. Khataraha iyo waxyeelada ECT waxaa ka mid ah:

- Waxaa laga yaabaa inaad aragto qaar ka mid ah waxyeelada ka imaneysa madax xannuunka, yalaalugada, mataga. Waxaa inaad u sheegtaa shaqaalaha ku ilaalinaya waxayna awoodi doonaan inay ku siiyaan daawooyin ku caawiya.
- Waxaa laga yaabaa inaad aragto muruqyo xannuun oo ay keentay midkood debcinta muruqyada ama waxqabadka muruqyada ee uu keenay qalalku.

- Suuxintu waxay saameynaysaa go'aankaaga 24 saac ee ugu horeeya. **Wakhtigan inta lagu jiro waa inaad:**
 - aadan kaxeeyn wax gaari ah
 - aadan ku shaqeyn wax mishiin ah, oo ay ka mid yihiin waxyaalaha wax lagu kariyo
 - gaarin wax go'aamo muhiim ah ama aadan saxiixin dukumiinti sharci ah
 - cabid aalkolo, aadan qaadan wax kale oo maskaxda dooriya ama aadan cabin sababtoo ah waxaa laga yaabaa inay la falgalaan daawada suuxinta.
- waxaa laga yaabaa inay saameeyso xusuustaada gaaban:
 - isla markiiba ECT –da ka dib dadka badidiisu waxay leeyihiin wakhti yar oo wareer ah mana xasuustaan daaweynta xaqiiqda ah.
 - intaad qaadaneyso ECT, waxaa laga yaabaa inay kugu sii adkaato inaad xasuusato macluumaadka aad dhawaan baratay, inkastoo dhibkaani uu baaba'ayo maalmaha iyo toddobaadyada soo socda ee dhammaadka intaad qaadaneyso ECT. Dadka qaarkii waxay sidoo kale ay soo sheegaan inay ka lunto qayb ka mid ah xasuusta dhacdooyinka dhacay maalmaha la soo dhaafay, toddobaadyada iyo bilaha ee intii ka horeysay ECT. Iyadoo xusuusahan badidoodu badanaa soo noqdaan xiliyo maalmo ah ama bilo wixii ka danbeeya ECT, dadka qaarkii waxay soo sheegeen dhibaatooyin wakhti dheer soconaya oo ku saabsan dib u helida xusuusahan. Xusuusaha dhacdooyinka ee wixii ku soo maray aad bay u yar tahay inay saameeyso ECT.
 - Inkastoo xusuus khaas ah oo ka soo bilaabanta wakhtiga aad qaadatay ECT laga yaabo inyan soo noqon, xusuustaada guud si ka fiican ayey u shaqeyn doontaa todobaadyada iyo bilaha ka danbeeya daaweynta.
 - Dhakhaatiirtaadu waa ka warqabaan dhibaatooyinka suurtagalka ah ee ku imanaya xusuusta waxayna kuu qori doonaan daaweyn ku siineysa daaweynta ugu wanaagsan oo iska ilaalineysa inay waxyeelayso xusuustaada sida ugu badan ee suurta galka ah.
- saameynaha kale waa kuwo aan caam aheyn qaarna waa aad ayey dhif u yihiin:
 - Waxaa jira khatar aan caam ahayn oo ah dhibaataada daawada, sida heerka garaaca wadnaha oo aan caaddi ahayn iyo ritamka. Waxaa laga

yaabaa in la arko kor u kac ku meelgaar ah oo ah xagga dhiiga iyo heerka garaaca wadnaha oo ay ka danbeyso heerka garacaa wadnaha oo gaabiya.

- Sida suuxinta guud ee kasta, waxaa jira khatar aad u jar oo dhimasho laakiinse suuxinta gaaban iyo ECT casriga ah, khatartaani hadda si aad ah ayey dhif u tahay, istarook ama dhaawac oo la xirriira muruqyada oo ku xirma ayaa sidoo kale aad dhif u ah. Qalabka neef siinta iyo nidaamka gargaarka degdega ah ayaa markiiba la helayaa haddii wax khaldamaan.

Ma u baahan doontaa daaweyn dheeraad ah?

Marka jiradaadu laga yaabo in lagu daaweeyo ECT. Jirada waxaa laga yaabaa inay soo noqoto marka daaweyntu dhammaato. Si lagaaga caawiyo inaysan tani soo noqon, dhakhtarkaaga ayaa kaala hadli doona wixii daaweyn dheeraad ah ee laga yaabo inaad u baahato marka ku daaweynta ECT –du dhammaato, sida:

- daawo
- sii wadida ECT
- Daaweynta dhimiriga

Cabashooyinka

TWaa in laguula dhaqmaa si sharaf iyo xushmad leh oo lagaa ilaaliyo in lagu waxyeeleeyo markaad qaadaneyso ECT. Haddii aadan ku faraxsaneyn wixii qayb ah ee ku saabsan daaweynta ama daryeelka waad caban kartaa. Meel fiican oo aad ka bilaabi kartaa waxaa weeye maareeyaha kiiskaga, kalkaaliyaha ugu weyn ama xubin kale oo ka mid ah kooxda daaweynta, sarkaalka xirriirka cabashooyinka ama la taliyaha isticmaalayaasha ee isbitaalka, ama Agaasimaha Dhimirka ee adeega caafimaadka dhimirka.

Waxaad sidoo kale u caban kartaa si toos ah Guddoomiyaha Adeegyada Caafimaadka adoo kala hadlaya taleefanka ah 8601 5200 ama dhakhtarka dhimirka ee ugu sareeya 1300 767 299.

Haddii aad uga baahan tahay caawimaad cabashadaada, waxaad weydiin kartaa qofaad ku kalsoon tahay inuu ku caawiyo. Tani waxay noqon kartaa xubin ka mid ah kooxda daaweynta, saaxiib, xubin qoyska ah, sharci yaqaan ama soo booqde bulshada ka mid ah.

Xiriirada muhiimka ah

Ururada aad la xiriiri karto wixii caawimaad ah iyo macluumaad dheeraad ah waxay ku qoran yihiin hoos:

- **Soo booqdayaasha bulshadu (*Community visitors*)** waa dad soo booqda adeegyada caafimaadka dhimirka ugu yaraan hal mar si ay wax uga weydiiyaan ku filnaanshaha adeegyada iyo tasiilaadka daaweynta daryeelka bukaanka, baaritaanka cabashooyinka iyo ka warbixinta weydiimahooda iyo baaritaanada.
5th Floor, 436 Lonsdale Street, Melbourne 3000
Taleefan: 9603 9500
Lacag la'aan: 1300 309 337
- **Xarunta Sharciga Caafimaadka Dhimirka (*Mental Health Legal Centre*)** wa adeeg sharci oo madax bannaan oo ku takhasusay arimaha sharciga caafimaadka dhimirka. Waxaa laga yaabaa inay awoodaan inay kuu soo diraan qof ku metela dhegeysiga Guddiga Dib u eegida Caafimaadka Dhimirka ama ay tallo kaa siiyaan arimaha kale caafimaad.
9th Floor, 10–16 Queen Street, Melbourne 3000
Taleefan: 9629 4422
Lacag la'aan: 1800 555 887
- **Caawimaada Sharciga ee Victoria (*Victoria Legal Aid*)** waxay bixisaa tallo sharci oo bilaash ah oo ku saabsan arimo badan oo kala duwan. Waxaa sidoo kale laga yaabaa inay ku siiso caawimaad sharci haddii aadan awoodin sharci yaqaan gaar ah waxaana laga yaabaa inay kaa caawiyaan metelaada sharciga ah ee dhegaysiga Guddiga Dib u eegista Caafimaadka Dhimirka.
350 Queen Street, Melbourne 3000
Taleefan: 9269 0234
Lacag la'aan: 1800 677 402
- **U doodaha dadweynaha (*Public Advocate*)** wuxuu caawiyaa, la taliyaa oo uu u doodaa dadka qaba cabashooyinka darran ee ku saabsan caafimaadka dhimirka iyo adeegyada iinta iyo daaweynta.
5th Floor, 436 Lonsdale Street, Melbourne 3000
Taleefan: 9603 9500
Lacag la'aan: 1300 309 337
- **Guddiga Xuquuqda Bani'aadamka iyo Fursadaha Sima nee Victoria (*Victorian Equal Opportunity and Human Rights Commission*)** wuxuu caawiyaa dadka si ay u xaliyaan cabashooyinka ku saabsan takoorida, leh hawlo khaas ah oo la xiriira Xeerka Xuquuqda iyo Masuuliyadka Bani'aadamka waxay bixin karaa tallo ku saabsan xeerka.
Adeegyada waxaa ka mid ah khadka weydiimaha iyo adeega xalinta cabashooyinka ee aan dhinacna raacsaneyn oo bilaasha ah.

Level 3, 380 Lonsdale Street, Melbourne 3000

Taleefan: 9281 7100

Lacag la'aan: 1800 13 41 42

Website: www.humanrightscommission.vic.gov.au

- **Dhakhtarka Dhimirka ee ugu sareeya (*Chief Psychiatrist*)** ee ugu sareeya waa sarkaal sare oo lagu magacaabay Wasaaradda Adeegyada Bani'aadamka Sharciga Caafimaadka Dhimirka, oo leh masuuliyad khaas ah oo la xiriira dadka qaata adeegyada caafimaadka Dhimirka. Kuwan waxaa ka mid ah awooda uu ku baaro cabashooyinka iyo arimaha kale iyo inuu qaado tallaabada lagama maarmaanka ah, iyo la socodka isticmaalk ECT ee Victoria gudaheeda.
50 Lonsdale Street, Melbourne 3000
Taleefan: 9096 7571
Lacag la'aan: 1300 767 299
- **Guddoomiyaha Adeegyada Caafimaadka (*Health Services Commissioner*)** waa guddoomiye madax bannaan oo baadha caawiyana inuu xaliyo cabashooyinka isticmaalayaasha daryeelka caafimaadka. Guddoomiyaha wuxuu ka caawin karaa bukaanka inay isticmaalaan macluumaadka caafimaadkooda.
30th Floor, 570 Bourke Street, Melbourne 3000
Taleefan: 8601 5200
Lacag la'aan: 1800 136 066
- **Ombudsman** ku wuxuu baadhaa cabashooyinka ku saabsan wasaaraddaha dawlada.
3rd Floor, 459 Collins Street, Melbourne 3000
Taleefan: 9613 6222
Lacag la'aan: 1800 806 314
- **Guddiga Dib u eegista Caafimaadka (*Mental Health Review Board*)** Dhimirka waa maxkamad yar oo madax bannaan oo dhageysata racfaanada bukaanka aan ikhtiyaarka lahayn, bukaanka ku jira amarka daaweynta aan ikhtiyaariga ahayn ee xaddidan iyo bukaanka ammaanka doonaya in laga saaro xaalada daaweynta aan ikhtiyaarka lahayn. Waxay sidoo kale dib ugu eegtaa bukaanadaan si toos ah.
Level 30, Marland House,
570 Bourke Street, Melbourne 3000
Taleefan: 8601 5270
Lacag la'aan: 1800 242 703
Fax: 8601 5299
Email: mhrb@mhrb.vic.gov.au
Website: www.mhrb.vic.gov.au

Waxaad sidoo kale weydiin kartaa maamulaha kiiskaaga ama xubin kasta oo ka mid ah kooxda daaweynta wixii ku saabsan ururada kale ee xaafada iyo kooxaha taageerada ee laga yaabo inay ku caawiyaan.

Buuggag yar yar oo daabacan 'Waxyaalaha ku saabsan xuquuqdaada' taxane ah:

- Bukaanaada aan daaweynta ikhtiyaarka u lahayn (*Involuntary patients*)
- Amarada daweynta khasabka ah ee la adkeeyey (*Restricted involuntary treatment orders*)
- Bukaanaada amaanka (*Security patients*)
- Bukaanka forensicada (*Forensic patients*)
- Ku daaweynta korontada (*Electroconvulsive therapy*)
- Daaweynta weyn ee aan dhimirka ahayn (*Major non-psychiatric treatment*)
- Amarada ilaalinta ee aan ahayn xagga xannaanada (*Non-custodial supervision orders*)

Buuggag yar yar oo daabacan 'Waxyaalaha ku saabsan xuquuqdaada' taxane ah:

- Bukaanka faraha (heynta iyo amarka xaalada ku meelgaarka ah) ee bukaanka (*Forensic (remand and interim disposition order) patients*)
- Siiwadida daawada (qaybta 12A – 12D) ee bukaanka aan ikhtiyaarka lahayn (*Continuing treatment (section 12A-12D) involuntary patients*)
- Qiimeynta amarada iyo wiisitada, qiimeynta iyo amarada daaweynta (*Assessment orders and diagnosis, assessment and treatment orders*)
- Qaliinka dhimirka (*Psychosurgery*)

Kuwan iyo buuggag yar yar oo kale ayaa laga helayaa internetka ah www.health.vic.gov.au/mentalhealth oo daabacaad weyn ah.

Buuggagg la soo xulay ayaa sidoo kale lagu helayaa afafka kale.

Khadka Macluumaadka Telefoonka

Waxaad dhegaysan kartaa macluumaad duuban oo ku saabsan daaweynta electroconvulsive oo ah tiro afaf kala duwan ah ado wacaya khadka macluumaadka taleefanka.

Khadadkaka taleefanku waxay furan yihiin 24 saac maalintii, toddobo maalmood isbuucii.

Ingiriisiga	9 679 9838
Carabi	9 679 9825
Kaamboodiyani	9 679 9826
Kantonese	9 679 9827
Karoweyshiyani	9 679 9828
Greek	9 679 9829
Talyaani	9 679 9830
Masidooniyan	9 679 9831
Mandarin	9 679 9837
Serbiyan	9 679 9834
Somali	9 679 9832
Isbaanish	9 679 9833
Turkish	9 679 9835
Fiyatnaamese	9 679 9836

Waxaa daabacay Qaybta Daawada iyo Caafimaadka Dhimirka ee Dawlada Victoria

Wasaaradda Adeegyada Bani'aadamka, Melbourne, Victoria, Australia.

© Xuquuqda xafidan waxaa iska leh Gobolka Victoria, Wasaaradda Adeegyada Bani'aadamka 2008.

Daabacaadan waxaa laga yaabaa in dib loo saaro qayb ahaan ama iyadoo dhan haddii la xuso cidda xuquuqa xafidan iska leh.

Sibteembar 2008 (080519)

Waxaa ogolaaday Dawlada Gobolka ee Victoria, Melbourne.

Miyaad ugu baahan tahay buuggan yar qaab kale?

Haddii aad ugu baahan thaay buuggan yar qaab kale waa inaad la hadashaa maamulaha kiiskaaga ama xubin kasta oo ka mid kooxda daaweynta.



Department of
Human Services